Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Kitaabka

dhiigagga haweenka

Waxaa soo tarjumay oo kasoo qaatay kitaabka Al Imaamu Al Nawawii ee Al Majmuuc

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi

Dhiigga Haweenka

Al Imaamu Al Nawawii wuxuu kitaabkiisa Al Majmuuc ku yiri:"Haweenka waxaa ka yimaada saddex nooc oo dhiig ah, oo kala ah:

Kow. Xaydka.

Xaydku waa dhiig haweenka uga yimaada caafimaad dartiis, midabkiisu waa madawyahay, waana kululyahay, xanuunna waa leeyahay. Xayd waxaa loogu bixiyay waa dureeraa, oo socdaa. Mudada xaydka waxaa ugu yar hal maalin iyo habeenkeeda, waxaana sidaas laga wariyay Imaam Cali bin Abii Dhaalib, Ilaahay Subxaanahu wa Tacaalaa, wajigiisa ka karaameeyo, raallina ha ka noqdee; waxaa ugu badan shan iyo toban maalmood, inteeda badanna waa lix ama toddoba maalmood. Dhiiggaan waxay soomaalidu tiraahdaa caado, maadaama uu bil walba si caadi usoo noqnoqdo. Waxaa u daliil ah inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Xamnah bintu Jaxash ku yiri: **"Taxiidiina sittata ayyaamin aw sabcatan fii cilmi Allaahi. Thumma ightasilii. Wa ithaa ra'ayti annaki qad dhahurti wa istanqa'ti fa sallii arbacan wa cishriina aw thalaathan wa cishriina laylatan wa ayyaamahunna wa suumii. Fa inna thaalika yujziiki wa kathaalika fa afcalii fii kulli shahrin kamaa yadh-hurna li miiqaati xaydihinna wa dhuhrihinna."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "Waxaa xaydku kaa soconayaa lix maalmood ama toddoba sida ah Cilmiga Ilaahay Tacaalaa. Markaas kaddib qubeyso, markaad aragto inaad daahir nadiif ah noqotay. Markaas waxaad salaadda tukataa afar iyo labaatan ama saddex iyo labaatan habeen iyo maalmohooda, Ramadaanna soon, taasaa kaa gunteysee. Bil walbana sidaas oo kale yeel". Waxaa wariyay Abuu Daauud, waana Xadiithkiisa tirsigiisu yahay laba boqol toddoba iyo sideetan, Al Tarmathii wuxuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa mujalladka koowaad bogga laba boqol kow iyo labaatan iyo kuwa kaleba, waana Xadiith saxiix ah.

Laba. Nifaas.

Nifaas waa dhiigga dhalmada kaddib soo baxa. Mudada uu dhiiggaas socdo waxaa ugu yar intii il biriqsi ku siman, waxaa ugu badan lixdan maalmood, inteeda badanna wuxuu socdaa afartan maalmood. Waxaa u daliil ah Xadiithka ay wariyeen Abuu Daa'uud iyo Tarmathi, inay Ummu Salamah, haweenta Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inay tiri: "Intay ahayd zamanka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, haweenka dhiigga dhalmada qaba waxay gurigooda fadhin jireen afartan maalmood oo ka dambeeya markuu dhiiggaas nifaasku ku bilawdo".
Waxaa nifaas loogu bixiyay isagoo dhiigaas nafs ama naf dhalatay kaddib yimaada.

Saddex. Istixaadah.

Istixaadah waa dhiigga haweenka qaarkood ka yimaada waqti aan ahayn markay caadada heli jireen, oo u dheer dhiigga caadada. Dhiiggaan midabkiisu waa gududd, wuxuuna ka yimaadaa xidid ee kama yimaado ilmo galeenka, sida dhiigga xaydka oo kale. Dhiiggaani ka hor istaagi mayo haweenta inay salaad tukato, ama ay soonto. Markii la gaaro waqtiga salaadda, intay farjigeeda dhaqdo ayay cudbi ama maro ku asturaysaa, markaas ayay inta weyseysato horay ka tukaneysaa. Soonkana sidoo kale ayay u soomeysaa. Waxaa u daliil ah Xadiithka ay wariyeen Al Bukhaarii iyo Muslim, inay Caa'ishah tiri: "Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa u timid Faadhimah bintu Abii Xubayshin, markaas ayay waxay ku tiri: "Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan ahay haweeney uu ku badan yahay dhiigga la yiraahdo istixaadah, marka daahir ma noqdo. Marka miyaan tukashada salaadda iska daayaa?" Wuxuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasaallam, ku yiri: **"Laa, innamaa thaalika cirqun wa laysa bi al xaydati. Fa ithaa aqbalati al xaydatu fa dacii al ssalaata. Wa ithaa adbarat fa aghsilii canki al ddama wa sallii."** Xadiith macnihiisu waxaa weeye*:* "Maya oo kaasu waa dhiig kale oo la yiraahdo Cirqun ee ma aha xaydkii. Markaad caadada heshid salaadda iska daa. Markuu waqtiga xaydkii dhammaado, dhiigga iska dhaq markaas salaadda tuko". Waxaa wariyay saddexda, oo ah Abuu Daauud iyo Al Tarmithii iyo Al Nasaa'ii.

Mudada ugu yar oo labo caado u dhexeysa oo ay haweentu daahir tahay waa shan iyo toban maalmood, inta ugu badanna xad ma laha. Da'da ugu yar oo gabadhu dhiiggii caadada ahaa ku dhaco waa sagaal sano. Al Shaaficii, Allaha u naxariistee, wuxuu yiri: "intaan maqlay wuxuu xaydku ugu soo degdegaa haweenka Tihaamah (oo ah Xijaaz oo ay Makkah Al Mukarramah iyo Al Madiinah Al Munawwarah ku yaallaan iyo Yaman), wuxuuna xaydku uga yimaadaa ayagoo sagaal sano jira." Al Tarmithii (1/207) iyo Al Bayhaqii (1/320) waxay Caa'ishah ka wariyeen inay tiri: "markay gabadhu sagaal sano gaarto waa haweeney."

Mudada uurka

Mudaday haweentu uurka leedahay waxaa ugu yar lix bilood iyo il biriqsiyo: **"Wa xamluhu wa fisaaluhu thalaathuuna shahran**(15)**"** oo ah "Sididdiisa iyo naas ka goyntiisu waa soddon bilood(15)" waana Aayadda shan ito tobnaad ee Suuratu Al Axqaaf. Aayadda afar iyo tobnaad ee Suuratu Luqmaanna waxay sheegtay inta la nuujinayo: **"Wa fisaaluhu fii caamayni**(14)**"** oo macneheedu yahay: "Waxanna naaska la nuujinayaa oo kaddib laga goynayaa laba sano(14)", marka waxaa sodoonkii bilood ka hartay lix bilood oo ah inta la sido. Waxaana ugu badan mudada uurka afar sano, inta badanna mudada uurku waa sagaal bilood. Al Bayhaqii (1/319) wuxuu Al Shaaficii ka wariyay inuu yiri: "waxaan Sancaa'a, caasimadda Yaman, ku arkay ayeeyo kow iyo labaatan sano jirta, oo waxay xaydday ayadoo sagaal jir ah, markaasaa la guursaday oo ay gabar dhashay ayadoo toban jir ah.

Gabadheeduna waxay xaydday ayadoo sagaal jir ah, markaasaa la guursaday oo ay dhashay ayadoo toban jir ah." Kitaabka Kifaayatu Al Akhyaari fii xalli ghaayati al ikhtisaari, uuna allifay Al Imaamu al callamah Taqiyyi Al Ddiini Abii Bakr bin Muxammadin Al Xusaynii (oo ah dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) Al Xusnii Al Dimashqiyyi Al Sh-shaaficiyyi wuxuu yiri: "Maalik wuxuu yiri: "haweentaan deriskeenna ah una dhaxda Muxammad bin Cajlaan waa haweeney runley ah oo fiican, ninkeeduna waa runlow fiican, waxayna saddex uur ku qaaday laba iyo toban sano, uurkiiba afar sano." Waxaa kaloo wariyay Mujaahid. Nin ayaa wuxu u yimid Maalik bin Diinaar wuxuuna yiri: "Abaa Yaxyow, u ducee haweeney uur leh muddo afar sano ah oo kurbaysan." Markaasuu u duceeyey. Markaasaa waxaa ninkaas u yimid nin kale oo ku yiri: "ka gaar haweentaada!" Markaasuu ninku tegay, wuxuuna soo noqday isagoo tunka ku sida wiil afar sano jira oo ay ilkihiisu siman yihiin. Runtana Rabii ayaa og." Waa intaas warka Kifaayatu Al Akhyaari.

Waxa haweenta dhiigga qabta xaaraanta ka ah

Haweenta dhiigga qabta waxaa ka xaaraan ah sideed waxyaalood:

Kow. Inay salaad tukato. Waxaa daliil u ah inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Ithaa aqbalati al xaydatu fa dacii al ssalaata."** Xadiithka macnihiisuna waxaa weeye: "Markuu xaydku yimaado, salaad ha tukanin". Waxaa kale oo Caa'ishah laga wariyay inay tiri: "Waan xaydi jirnay, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa. Markaan ka qubaysannana waxaa nala amri jiray inaan soonkii naga tagay qallaynno, salaaddii naga tagtay inaan qallaynana nalama amri jirin".

Labo. Inay soonto, siday Caa'ishah u tiri: ": "Waan xaydi jirnay, Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, agtiisa. Markaan ka qubaysannana waxaa nala amri jiray inaan soonkii naga tagay qallaynno."

Saddex. Inay Quraanka akhriso, waxaana u daliil ah Aayadda sagaal iyo toddobaatanaad ee Suuratu Al Waaqicah: **"Laa yamassahu illaa al mudhahharuuna**(79)**"**, oo macneheedu yahay "Mana taabto ruuxaan daahir ahayn(79)". Al Tarmithii wuxuu Ibnu Cumar ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa yaqra'u al junubu wa laa al xaa'idu shay'an mina Al Quraani."** Xadiithka macnihiisu waa: "Ma akhrin karo qof janaabo qaba iyo haweeney dhiig qabta wax Quraanka ka mid ah."

Afar. Inay kitaabka Quraanka taabato, ama ay qaaddo oo wuxuu Al Daarqudhniyyu Cabdu Allaahi ibn Cumar ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Laa yamassu Al Quraana illaa dhaahirun."** Xadiith macnihiisu waxaa weeye: "Quraanka yuusan taaban qof aan daahir ahayn".

Shan. Inay Masaajid gasho. Al Bukhaarii wuxuu Caa'ishah ka wariyay inay tiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo masjidka ku dhex jira, oo ictikaafsan ayuu madaxiisa guriga soo gelin jiray, markaasaan u shanlayn jiray (ayadoo dhiig qabta oo aan masjidka geli karin)." Abuu Daauud iyo Al Bayhaqi waxay wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Innii laa uxillu al masjida li xaa'idin wa laa junubin"**, oo macnihiisu yahay: "Anigu u xalaalayn mayo inay masjidka galaan haweeney dhiig qabta iyo qof janaabo qaba, lab iyo dheddigba weeyey."

Lix. Inay Kacbada ku dhawaafto, waxaana u daliil ah inuu Al Bukhaarii Caa'ishah ka wariyay in ayadoo xajka u socota ay caadadii ku dhacday, oo uu markaas Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri: **"Ifcalii maa yafcalu al xaajju ghayra an laa tadhuufii bi al Bayti xattaa Tadh-hurii."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeyey: "Samee intuu sameeyo qofka xajjinaya, hase ku dhawaafin Kacbada jeer aad dhaahir noqoto (oo aad dhiiggu intuu kaa go'o aad ka qubaysatid)".

Toddoba. Inay ninkeeda la gogol gasho, waxaana u daliil ah Aayadda laba boqol iyo laba iyo labaatan ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa laa taqribuuhunna xattaa yadh-hurna"** oo macneheedu yahay: "Hana u dhawaanina jeer ay daahir noqdaan". Waxaa Abuu Daa'uud uu Cabdu Allaahi ibn Mascuud ka wariyay inuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waydiiyay inta haweentiisa oo caadada qabta uga xalaal ah, uuna ku yiri: **"Laka maa fawqa al izaari"** oo macnihiisu yahay: "Waxaa kuu bannaan inta meesha guntiga laga xirto ka korreysah, waana xudunta".

Sideed. Inay ka raaxeysato inta u dhexeysa xudunta iyo jilibka, siduu caddeynayo xadiithka aan qodobka toddobaad ku soo aragnay oo ah **"Laka maa fawqa al izaari"** oo macnihiisu yahay: "Waxaa kuu bannaan inta meesha guntiga laga xirto ka korreysah".

Qofka janaabada qaba waxaa ka xaaraan ah lix waxyaalood:

Kow. Inuu salaad tukado, sida ay culummado isugu raaceen.
Labo. Inuu Quraanka akhriyo, waxaana u daliil ah xadiithka laga wariyay Imaam Cali bin Abii Dhaalib.
Saddex. Inuu kitaabka Quraanka taabto.
Afar. Inuu kitaabka Quraanka qaado
Shan. Inuu kacbada ku dhawaafo, waxaana u daliil ah xadiithka uu wariyay Al Xaakim, inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Al Dh-dhawaafu bi Al Bayti salaatun"** oo macnihiisu yahay: "Kacbada ku dhawaafkeedu waa salaad".
Lix. Inuu masaajidka dhexdiisa ku nagaado, waxaana u daliil ah Aayadda saddex iyo afartanaad ee Suuratu Al Nisaa'i: **"Walaa junuban illaa caabirii sabiilin xattaa taghtasiluu"**, oo macneheedu yahay: "Iyo adinkoo janaaba

qaba inaad dhexdiisa martaan mooyee intaad ka qubaysataan". Wuxuu Abuu Daa'uud ka wariyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inuu yiri: **"Innii laa uxillu al masjida li xaa'idin wa laa junubin"**, oo macnihiisu yahay: "Anigu u xalaalayn mayo inay masjidka galaan haweeney dhiig qabta iyo qof janaabo qaba, lab iyo dheddigba weeye."

Qof musqul galay, markuu istinjoodo kaddib, ama dhuusay, waxaa ka xaaraan ah saddex shay:

Kow. Inuu salaad tukado, waxaana u daliil ah xadiithka uu Al Tarmathi ka wariyay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, inuu yiri: **"La yaqbalu Allaahu salaatan bi ghayri dhahuurin wa laa sadaqatan min ghuluulin."** Xadiith macnihiisu waxaa weeye: "Ilaahay ma qabalo salaad wayso la'aan lagu tukaday iyo sadaqo maal xaaraan ah laga bixiyay".

Labo. Inuu Kacbada ku dhawaafo, waxaana u daliil ah Xadiithka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: **"Al Dh-dhawaafu bi Al Bayti salaatun"** oo macnihiisu yahay: "Kacbada ku dhawaafkeedu waa salaad".

Saddex. Inuu kitaabka Quraanka taabto, siday u sheegtay Aayadda sagaal iyo toddobaatanaad ee Suuratul Waaqicah: **"Laa yamassahu illaa al mudhahharuuna"**, oo macneheedu yahay "Mana taabto ruuxaan daahir ahayn". Wuxuu Ibnu Xabbaan wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Laa yamassu Al Quraana illaa dhaahirun"**, oo macnihiisu yahay: "Quraanka ma taabto qof aan dhaahir ahayn".